Faallaynta Buugga “ Dagaalladii Basaasiinta Qarnigan 21aad”

Hordhac

Buuggan la yidhaa “~Dagaalladii Basaasiinta Qarnigan 21aad ” waxa qoray **Majdi Xuseen Kaamil**. Majdi, waa Qoraa, Wariye, iyo Turjumaa. Mareego kaladuwan oo dalka Masar ka soo baxa ayuu wax ku qori jiray. Wuxuu u dhashay dalka Masar. Wuxuu dhashay sannadkii 1970kii.

Majdi,Waa qoraa muddo badan wax qorayay saaxadda qoraannimada ku jiray. Hadda wuu noolyahay.

Buuggan uu Majdi qoray ayaan isku dayi inaan si kooban u tilmaamo nuxurkiisa, iyo waxa uu ka warramayo. Weliba waxa aan doorbiday inaan sookoobidda ku soo qaato hordhaca buugga, oo soo afnaqo iyada oo faahfaahin wadata.

Muxuu Buuggu ka Warramayaa?

Hawlgallada Ruushka ayaa soo caddeeyay in Sargaal dalkooda u dhashay oo la odhan jiray ‘ Alexander Litvinenko’ lagu dilay Magaalada London ee Caasimadda Ingiriiska. Weliba waxaa lagu dilay oo lagu buufiyay Sunta la yidhaa ‘ Plonium 210’ oo shucaac wax ku disha. Markan oo ahayd markii koowaad ee suntaas la adeegsado. Marka sidaa loo shaydhiyo islamarkaaba waxa ay googoysaa oo qurubqurub u jarjartaa jidhka. Waxa ay sii daysaa sun halis badan, waana suntan loo adeegsado in Basaasiinta lagu laayo Qarnigan kow iyo Labaatanaad.

Sargaalka dhintay mid ka mid ah asxaabtiisii ugu dhawayd ayaa helay farriin uu Sargaal Alexander Litvinenko qoray intii uu noolaa oo uu ku saadaaliyay in dilkiisa iyo sumayntiisaba uu masuul ka noqonayo Madaxweynaha Ruushka Mr. Falaadhamir Butin, farriinta uu basaasku ka tagay waxa ay u dhignayd: “ Waxaa dhaba oo aan xaqiiqsaday in aanad waxyar oo ixtiraam iyo qaddarin ah u haynin nolosha iyo xorriyadda. Ilbaxnimada iyo horumarkuna agtaada ayna wax qiimo ah ka lahayn. Waxa kale, oo aan xaqiiqsaday in aanad u qalmin xilka aad haysid. Inkasta oo aad ku guuleysatid in aad qof aamusiisid, balse Sayid Butinoow, dhawaqa agtaada iyo daafaha adduunyada ka baxayaa dhegahaaga ayay tiri doonaan oo nolosha mar uun baad dhegabeeli doontaa.”

Xilliga ay dhacdadan ugubka ahi dhacday waxa jirtay suurtagalnimo iyo tuhun runta u dhaw oo ah in basaaskaa

Alexander Litvinenko uu dilkiisa ka danbeeyo Madaxweynaha Ruushka Mudane Butin, oo aargoosi ahaan uu u dili jiray. Waxa kale, oo iyadna jirtay oo la isladhexmarayay in Suuqa madaw uu Ruushku ku sii daayay in lagu iibiyo Hubka Nukliyeerka, iyo in suuqa madaw lagu gadayay Sunta sida ‘ Plonium 21o’ oo kale ah oo gacanta u gashay dad ay iyagu ku tilmaameen argagixiso.

Basaasnimadu waa ciyaar duug iyo soojireen ah oo aan dhammaad lahayn, ayna waligood dawluhu isticmaali jireen. Basaasnimadu waxa ay ahayd, ahaanna doontaa hubabka adduunka ugu khatarsan ee lagu dagaallamo, waana hab sirdoonka iyo wardoonku u adeegsan jireen si farshaxamaysan oo kolba duruufta lagu jiro iyo waqtiga la jaanqaadaysa. Dawlad waliba waxa ay basaasiinteeda u tababbartaa inay aad isha ugu hayaan dawladaha maslaxadi ka dhexayso, ayna fashiliyaan shirqoollada ay u maleegayaan. Basaasnimadu waa hubka ugu culus ee dawladuhu masaalixdooda iyo siyaasadahooda ku ilaaliyaan. Waa habka shirqoollada, kaartooyinka iyo dhegaraha loo maleego. Ama waa habka uu dal u ogaado awoodda uu cadawgiisu leeyahay, iyo inta uu leegyahay. Mararka ay xaaladuhu qadhaadhaadaan waa habka asxaabta kuu dhawdhaw loogu hurgufo. Waa kaartada la adeegsado marka….

Ka dib markii uu dhammaaday Dagaalkii qaboobaa Basaasnimadu aad ayay u dhaqangashay oo uga firfircoonaatay sidii ay markii hore ahayd ee lagu yaqaannay. Wuxuu yeeshay

saamayn aan hore looga baran. Hab saddexaad ayaa soo baxay. Basaasnimadii waxa ku soo kordhay hab kale oo cusub oo basaasnimo ah, habkaa cusub ee basaasnimada ku soo biiray waxa uu ahaa in ay aqoontii ku milantay basaasnimada, oo basaasnimadii la aqooneeyay! Waxaa qarnigan Kow iyo labaatanaad soo cusboonaaday oo soo baxay aqoonyahannno iyo xeeldheerayaal wax soo ikhtiraaca oo soo kordhiya, se basaasnimadii aqoonta hoosgaliyay.

Arrinta khatarta ahi waxa weeyi in basaasnimadii laga helo meelaha khatara ah ee xasaasiga ah adduunyadiina ay dhexqaadday basaasnimadu. Aqoontii iyo basaasnimadii isku milmay waxa ay keeneen in hab cusub oo sirta loo helo la ogaado, iyo in waqtiga sirta la ogaanayo aad loogu dhugyeesho.

Buuggan, waxa uu qoraagu ku qaadaadhigayaa basaasiintii ugu layaabka badnaa basaasiinta Qarnigan Kow iyo Labaatanaad ee fashilmay, markii la qabtay sida ay noqdeen, iyo sida doonistoodii loo xaddiday. Basaasiinta qarnigani lama mid aha kuwii hore. Way ka halis badanyihiin, way ka maskaxbadanyihiin oo kaga awoodbadanyihiin kuwii hore dhinaca wax ikhtiraacidda, galaangalka, iyo helidda xogaha iyo siraha.

Inkasta oo adduunyadu horumartay, warashado la sameeyay, oo Tiknoolajiyaddu meel heersarraysa marayso qarnigan kow

iyo Labaatanaad; balse, basaasnimadu waxa ay ka midtahay arrimaha laga gungaadhi waayay oo lama awoodin in laga gungaadho, ama halkii la rabay laga gaadho waqtiga ku habbooon arrimaha la xidhiidha sirta, xogaha xasaasiga ah, iyo warerka xiisaha leh ba.

Qarnigan aynu hadda noolnahay waxa uu la kawsaday oo soo jira noocyo badan oo basaasnimo ah. Basaasnimadaa cusub waxa ka mid ah " Basaasnimada go'aannada siyaasadeed. Basaasnimada Tiknoolajiyadda iyo aaladaha cusub. Basaasnimada Internetka iyo Shabakadaha. Basaanimada Bangiyada iyo Keydadka lacagta IWM." Waxa kale, oo sii jirta isaga oo adeegsanaya lacagta, iyo galmada ama dumarka jidhkooda lagaga ganacsado ee wax waydaarsada.

Basaasiinta aynu soo qaadan doonno waa kuwii bilowga qarnigan la qabqabtay ee fashilmay. Badankoona waxaa la qabtay sannado badan ka dib markii ay in badan wax basaasayeen ee xogo gudbinayeen. Qaabka loo qabtay waa qalad xaggooga ka yimid (xeeladda oo ay qaldeen), iyaga oo sameeyay qalad ayna u kasin, ama iyaga oo uu basaas ay aamineen oo saaxiibkood ahi basaasay, IWM. Waxa ay ka simanyihiin waxa weeyi in dhammaantood ay faraha kula jireen arrimo basaasnimo, muddo badanna ay arrimo basaasnimo ka shaqaynayeen.

Saamayntaa ay yeelatay basaasnimadu waxaa sababay xukunnadii iyo maammuladii waqtigaas jiray. Maammuladaasi iska dhigayay inay dan shacab ka shaqaynayaan iyo inay danta dalka ilaalinayaan iyaga oo aan kala garanayn qofka khaa'inka ah iyo ka daacadda ah! Markaas ayuu basaaskii noqday qof ka mid ah oo kaba tirsan, kuna dhex jira.

Inta aynaan eegin shabakada iskuxidhan ee Basaasnimada ee la ogaaday inta lagu jiro qarnigan Kow iyo labaatanaad, waxa aynu cayimi duruufta iyo lebbiska isla baddelay fahankii laga haystay basaasnimada soojireenka ahayd ee dhacday waqtiyadii dhexe gaar ahaanna dhammaadkii qarnigii kan ka horreeyay. Waxa kale, oo aynu ogaan doonnaa shikiyada cusub, iyo kaartooyinka ay ku dhuuntaan basaasiinta qarnigani.

Qarnigani waxa uu la bilaabmay oo la kowsaday dhacdooyin badan. Bilowgaba waxaa dhacay saddex dhacdo oo waawayn, oo ah sirta ugu wayn ee ka danbaysa xaaladda ay dadku hadda ku jiraan, iyo waxa dadka haysta ee dhibaatooyin iyo masiibo ah.

1- Dhacdada koowaad, waxa ay ahayd Tiyaarkii Masiixiyiintii oo hoostagay Maamulkii Maraykanka oo uu xukunka u qabtay Buush. Buush oo ahaa nin cunfi iyo cunsuriyad hadhaysay ayaa

aragtidiisa adduunka u kala qaybiyay laba qaybood. Qayb Maraykan iyo Israa'iil la jirta, iyo qayb kale oo ka soo horjeedda oo la col ah. Cidkasta oo ka soo horjeeddaana waxa ay ahayd cadaw iyo dad aan qiimo lahayn. Maraykan iyo Israa'iil waa dhinac, halka Iiraan iyo waddada la jaarka ah ee Carabta ahina ay safkale ahaayeen. Cidkasta oo Maraykan cadaw ku ahi Isaa'iil ayay cadaw ku tahay. Xulafo ayay ahaayeen, waxayna rabeen inay Khariidadda Bariga Dhexe meesha ka saaraan.

2- Dhacdada labaad, waxa ay ahayd dhacdadii Sirihii Mataanaha ee lagu qarxiyay Maraykan bishii Semtenber Sannadkii 2001dii. Qaraxan waxaa ka danbeeyay ururka Al Qaacida, se wuxuu noqday wax uu Buush marmarsiiyo ka dhigto. Waxa kale, oo la sheegaa inuu ahaa marmarsiiyo la rabo in lagu qabsado ilaha awoodda adduunka, iyo in la daciifiyo awoodda kuwa wanaaga u dagaallama.

3- Dhacada saddexaad waa mid ka dhalatay labadaas dhacdo ee isbarkan, waana ta la yidhaa ' La dagaallanka Argagixisda' waa kalmad iyo weedh dhab ah, se Maraykanku qaab baaddil ah u adeegsado, meel aan meesheedii ahayna u adeegsado.

Saddexdaas dhacdo ee waaweyni waxa ay dhaleen oo ka danbeeyeen laba dagaal oo waaweyn oo dhacay sannadihii ugu horreeyay ee Qarnigan Kow iyo Labaatanaad. Labadaad dagaal waxa ay ahaayeen: Dagaalkii lagu qaaday Afgaanistaan, iyo

dagaalkii lagu qaaday Ciraaq. Dagaalka Afgaanistaan lala galay waxaa loo soo maray in ay Daalibaan joogto dalka, iyo in lala dagaallamayo Usaama Billaadin oo uu Qaraxii Siraha mataanaha ee Maraykanka ku luglahaa oo fuliyay. Markii uu Maraykanku galayna waxaa loo arkayay inuu kula dagaallamayo dagaalkii Al Qaaciida.

Dhinaca kale, marka aynu eegno Ciraaq, arrinta Ciraaq gebi ahaan ba way ka duwanayd kuwa kale, oo Caalamku wuxuu ogaaday in arrintu ayna ahayn in argagixiso lala dagaallamayo (sida Ruushku sheegay ee gabbaadka ka dhiganayo), se ay ka gundheertahay oo ay tahay qorshe uu Maraykan ka danbeeyo oo waqti hore la dejiyay, oo ay isku dayayaan shirqoolladooda shaydaaniga ah ee ay Bariga dhexe ka wadaan, Muslimiintana ku dhibayaan inay ku qariyaan, oo ay rabaan inay dhulkooda qabsadaan, hantidoodana ku tasarrufaan, maamulkoodana hoosgeeyaan Maraykan iyo Israa'iil.

Markay xaaladi halkaa marayso, ee labadaa dhacdo ee waaweyna ay jiraan waxa gebi ahaan ba isbeddelay fahankii laga haystay basaasnimada, waxaana soo baxay basaasnimo ugub ah oo lagu magacaabay ' Basaasidda go'aannada Siyaasadeed.' Waana kuwa qorsheeya ee go'aamiya dagaallada dhacay, iyo Istaraatijiyadda ay u dhacayaan. Waa nooc ka mid ah basaasnimada caalamku waayadan la kowsaday.Waxaa bilaabmay in qolaba dhegaysato qolada kale ee ka soo

horjeedda ee ay is hayaan, Waxaa bilaabmay in la dhinaca hawada la iska basaaso oo telefoonnada lagu wada xidhiidhayo la basaaso. Waxaa la basaasay waxa dhexmara Madaxweynihii Maraykanka Buus, iyo saaxiibkiisii dagaalka Mudane Tooni Balayr oo ahaa Raysalwasaarihii Ingiriiska, oo ay arrimo sira ka wada hadlayeen. Waxa iyadna arrin caadiya ahayd in Buush dhinaca xidhiidhka iyo telefoonnada ka basaaso Xoghayihii Guud ee Qaramada Midoobay waqtigaa mudane Koofi Anaan. Waxa kale, oo iyadna arrin dabiiciya ahayd in la basaaso golaha Sare Ammaanka si dib loogu ajandayaasha ay rabaan inay mustqabalka ka hadlaan, marka la dareemo inay rabaan ka hadlidda arrimo xasaasiya oo sida dagaallo oo kale.

Saaxaddii Basaasnimada iyo sirdoonka waxaa ku soo biiray arrimo cusub oo ugub ah, kuwaasi oo ah in xataa Madaxdu wax basaasto, oo telefoonnada iyo kaartooyin kale wax ku basaasaan. Habka ay werka ku helayaan ama amarrada ku bixinayaan ma ahayn mid toos ah oo la fahmi karo, sida ay samayn jireen Tony Blair kii Ingiriiska ahaa, iyo Koofi Anaankii Qaramada Midoobay haystay marka ay wax basaasayaan. Sidoo kale, waxaa isna wax Basaasi jiray Madaxweynihii Maraykanka Mudane Buush, oo Buush wuxuu soo dirsaday Dhakhtarad Maraykan ah joogta oo asal ahaan Ciraaqiyad ah, si ay ugu soo basaasto Saddaam Xuseen waxyar ka hor intii aannu Maraykanku duulin Ciraaq ku. Basaasadda Dhakhtaradda ah magaceeda waxaa la odhan jiray Sawsan Xaddaad, waxa ayna

ka shaqayn jirtay Dhakhtarka Kaliiflaan! Waxa iyaguna jiray kuwa lacago badan ku qaata dhegaysiga, iyo basaasidda hadallada madaxda.

Qoraagu buugga ayuu ku faahfaahinayaa, iyaga oo loo bixiyay ‘ Basaasiinta dhegaysiga, dabagurka madaxda.’ Madaxweyne Buush ayay wax ka xadeen, ka dib markii ay gubeen xidhiidhadiisii gaarka ahaa, ee sirtu ugu jirtay, waxayna ka qaateen farriimo.

Maadaama dagaalladan basaasnimadu si gaar ah u beegsanayaan Muslimiinta iyaga oo fulinaya falal xun oo meelo kale laga soo agaasimay, qorshayaal kalana wata, waxaa soo baxay nooc cusub oo Basaasnimo ah oo la yidhaa ‘ Basaasidda Dhaqdhaqaaqyada Islaamiga ah.’ Weliba waxa si gaar ah loo sii basaasi jiray dhaqdhaqaaqyada Muslimiinta sida hantidooda, bangiyadooda, lacagtooda iyo waxkasta oo ay samaynayaan, halkaasn waxaa ka dhashay magaca la yidhaa ‘ Basaasidda Bangiyada.’

U jeeddada Basaasiddan loo sameeyay waxa ay ahayd in guud ahaan Waddamada Muslimiinta laga ilaaliyo argagixisada, iyada oo loogu soo gabbanayo ladagaallanka Argagisida! Eraybixin cusub ayaa kanna soo sameeyay waxaa loo bixiyay ‘ Basaasiinta Al Qaaciida.’ Sida aynu kaga warrami Cumar Naasiri oo

sheekadiisu buuggan ku xardhantahay. Waxyar ka dibna aan halacsan.

Waxa iyadna jirta in ay isbahaysteen Yuhuudda iyo Maraykanku oo ay basaaseen Kanada oo ay col ahaayeen. Halkaana waxaa ka soo baxay basaasnimo cusub oo lagu magacaabay ‘ Basaasnimada Saaxiibbada.’ Waxaynta taasi caddaynaysaa sida Qarnigan Basaasnimadu u noqotay mid aan kala saarayn oo kala aqoon ‘ Saaxiib/taageere, iyo cadaw.’

Qarnigan Sannadihiisii hore waxyaabaha soo ifbaxay waxa ka mid ahaa waxa lagu magacaabay ‘ Iibsiga Hubka Nukliyeerka.’ Oo ku xidhnaa ‘ Suuqa Madaw ee ka Ganacsiga Hubka Nukliyeerka.’ Waxaa arrintaana ibafur u noqday Hubyaqaankii waynaa ee Baakistaaniga ahaa Cabdiqaddiir Khaan, waxsoosaarkiisa ka iibin jiray ciddii lacag haysataba. Waxaa dadka ka iibsada ugu horreeyay Kuuriyada Waqooyi iyo Iiraan. Markii ay hubka iibsadeen aad baa loola dagaallamay labada dalba oo waxbadan ayaa la maslaxayay.

Qarnigan Sannadihiisii hore waxyaaabaha soo baxay waxa ka mid ah waxa lagu magacaabay ‘ Basaasiinta Internet ka’ kuwaasi oo jabsada Kombuyuutarrada, Shabakadaha Internetka, Wabsaydada , IWM. Kuwaasi oo keenay in xogo la isdhaafsado.

Qarnigan Sannadihiisii hore waxyaabaha soo baxay waxa ka mid ah Loollanka dhaqaale ee u dhexeeya Caalamka, gaar ahaanna Jaynaha iyo Maraykanka. Loollankaasna waxaa loo yaqaan ‘ Basaasiinta Dhaqaalaha.’

Qarnigan Sannadihiisii hore waxyaabaha dhacay waxa ka mid ah dilkii loo gaystay shaqaalaha iyo Basaasiinta sida ay markii koowaad sheegtay Wakaaladda Sirdoonka Maraykanka ee ‘ SIA.’ Sida caada ahi waxa weeyi in wararkan la qariyo oo aan la sheegin, se anigu badka ayaan keeni!

Akhristaha sharaftalahoow, buuggani waxa uu kaaga warramayaa qisooyinka ugu caansan/wanaagsan ee ku saabsan Basaasiinta Qarniga 21aad. Wuxuunna muuqaallo cadcad oo khatara ka bixinayaa waxyaabo hore looga warramin oo ku saabsan Caalamka basaasnimada!

Si guud buuggu waa intaa.

Gebagebo

Buuggu waa buug xiisa leh. Wuxuu qaadaadhigayaa qisooyinka ugu caansan/wanaagsan ee ku saabsan Basaasiinta Qarniga 21aad. Wuxuunna muuqaallo cadcad oo khatara ka bixinayaa waxyaabo hore looga warramin oo ku saabsan Caalamka basaasnimada!

Ciddii u baahan faahfaahin intaa ka badan waxa aan kula talin lahaa inay buugga akhriyaan.

Dhammaad

Diyaarin: Cabdirasaaq Sandheere

Telegram:kaydbooks